# DARAASADDA DHAQANKA IYO BULSHADA DOORS OPEN

XILIGA QABOOBAHA 2026

**King County waa degmo leh ka qaybgalayaasha bulshada dhaqanka oo xarakaad badan.**




93 % kamid ah dadka degan Degmada King ayaa ka qaybgala hawlaha dhaqanka!*

## DHAQANKU WUXUU HAGAAJIYAA NOLOSHA

**Dadka degan Degmada King waxay ka qaybgalaan dhaqanka si ay:**

- Ula xiriiraan qoyska iyo asxaabta
- U dareemaan dareen ka mid ahaansho
- U kobciyaan maskaxdooda
- U nastaan oo ugu raaxeeyaan naftooda

In ka badan **9 ka mid ah 10-kii** qof oo degan Degmada King ayaa aaminsan in hawlaha dhaqanku ay saameyn wanaagsan ku leeyihiin caafimaadkooda iyo badqabkooda iyagoo sidoo kale bixinaya natiijooyin kale sida helitaanka aqoonta, dhimrinta, xiisaha, fikirka muhiimka ah, iyo waxyaabo kaloo badan.



## DHAQANKU WAA BULSHO




**97% kamid ah Dadka Degmada King ayaa aaminsan in ururada dhaqanku saameyn togan ku leeyihiin bulshadooda, iyadoo saameynta ugu badan ay ku dhacdo:**

- Bixinta fursado waxbarasho
- Hagaajinta tayada nolosha
- Xushmeynta kala duwanaanshaha dhaqanka
- Horumarinta ka-qaybgalka nolosha bulshada

Iyo **5 ka mid ah 6-dii** qof oo degan Degmada King ayaa aaminsan in ururada dhaqanku ay gacan ka geystaan isku socodka dhaqaale ee bulshadooda sidoo kale!



**ISHA:** King County Resident Culture & Communities Survey (Daraasada Dhaqanka iyo Bulshooyinka Dadka Deggan Degmada King), oo ay soo gudbisay 2026 Wilkening Consulting oo wakiil ka ah 4Culture.

*Macluumaad ku saabsan sida loo qeexo ka qaybgalka dhaqanka ayaa lagu daray warbixinta buuxda.

© 2026, 4Culture and Wilkening Consulting, LLC

DOORS OPEN · 4 CULTURE · WilkeningConsulting

# DARAASADDA DHAQANKA IYO BULSHADA DOORS OPEN

## LAAKIIN CAQABADO AYAA WALI JIRA

Iyadoo ay jiraan natiijooyinkaan wanaagsan, dad badan oo degan Degmada King ma awoodaan inay ka qaybqaataan dhaqanka sida badan ee ay jeclaan lahaayeen.

**Caqabadaha ugu waaweyn ee hortaagan ka qaybgalka sareeya waxaa ka mid ah:**

- Qiimaha
- Waqtiga
- Danaha kale/mudnaanta

Caqabadaha kharashka ayaa ugu badan dhalinyaradaqaangaarka ah ee ka yar 40 sano oo aan carruur lahayn, qoysaska haysta carruurta yaryar, iyo qoysaska dakhligood hooseeyo.

**3 ka mid ah 5 tii** qoys oo dagan King ayaa sidoo kale qaba baahiyaha helitaanka iyo taageerada.

Dadka degan Degmada King waa ka qaybgalayaasha dhaqanka, waxayna rabaan in ururadooda dhaqanku ay u awoodaan inay u adeegaan bulshooyinkooda.




**92% kamid ah Dadka Degmada King ayaa isku raacsan in King County Council (Dawlada Hoose ee Degmada King) ay ka shaqeyso sidii uu u taageeri lahaa ururada dhaqanka ee degmada**

Ururradani ma aha kuwo 'dheeraad' ah — waa laf-dhabarta isku xirta wax walba." Waxay abuuraan meelo ay dadku kula kulmaan dhaqamo ka baxsan kuwooda, waxay dhisaan naxariis, waxayna dareemaan dareenka ka mid ahaanshaha. La'aanta ururadaan, Degmada King waxay ahaan lahayd meel kala go'an, xiise la'aan ah, oo naxariis yar."

– Qof dagan Degmada King



**ISHA:** King County Resident Culture & Communities Survey (Daraasada Dhaqanka iyo Bulshooyinka Dadka Deggan Degmada King), oo ay soo gudbisay 2026 Wilkening Consulting oo wakiil ka ah 4Culture.

*Macluumaad ku saabsan sida loo qeexo ka qaybgalka dhaqanka ayaa lagu daray warbixinta buuxda.

© 2026, 4Culture and Wilkening Consulting, LLC

DOORS OPEN  4 CULTURE  WilkeningConsulting